# Suurat Al-Mulk

# سُورَةُ المُلْكِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa barako badnaaday (oo weynaaday) Eebaha Xukunku awooddiisa ku jiro ee wax walbana kara.

تَبَٰرَكَ ٱلَّذِي بِيَدِهِ ٱلْمُلْكُ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ ١

2. Eebaha abuuray geeri iyo nololba, si uu dadow idiin imtixaamo kiinna Camal fiican, Eebana waa adkaade dambidhaafe ah.

ٱلَّذِي خَلَقَ ٱلْمَوْتَ وَٱلْحَيَوٰةَ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا
وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْغَفُورُ ٢

3. Eebe waa midka abuuray Toddobo Samo oo isdul saaran kuna arki maysid abuurka Eebaha Raxmaanka ah kala tagsani, bal daymada celi inaad aragto wax dillaac ah.

ٱلَّذِي خَلَقَ سَبْعَ سَمَٰوَٰتٍ طِبَاقًا مَّا تَرَىٰ فِي خَلْقِ
ٱلرَّحْمَٰنِ مِن تَفَٰوُتٍ فَٱرْجِعِ ٱلْبَصَرَ هَلْ تَرَىٰ
مِن فُطُورٍ ٣

4. Haddana celi daymada waxaa kugu soo noqon aragga oo dhiban daallanna.

ثُمَّ ٱرْجِعِ ٱلْبَصَرَ كَرَّتَيْنِ يَنقَلِبْ إِلَيْكَ ٱلْبَصَرُ خَاسِئًا
وَهُوَ حَسِيرٌ ٤

5. Eebe wuxuu ku qurxiyey Samada dhow Nalal (Xiddigaha) wuxuuna ka dhigay Xiddigahaas kuwo lagu gano Shayaadiinta, Wuxuuna Eebe u diyaariyay kuwaas Naarta Saciiro.

وَلَقَدْ زَيَّنَّا ٱلسَّمَآءَ ٱلدُّنْيَا بِمَصَٰبِيحَ وَجَعَلْنَٰهَا رُجُومًا
لِّلشَّيَٰطِينِ وَأَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابَ ٱلسَّعِيرِ ٥

Eebe khayrkiisu waa badan yahay wax walbana awooddiisay ku hoos jiraan wuxuu doonana wuu karaa, dadkana waxaa loo abuuray in la imtixaano kooda Camal Aakhiro iyo kan aduunkaba wanaajiya, Eebe abuuriddiisa uu Cirka abuurayna wax dhaliil ah loo heli maayo sida Khalqigiisa kalaba, Xiddigahana Eebaa abuuray iyagoo Nalal u ah Cirka'Shayaadiintana lagu eryo, Eebaha awooddaas leh waa in la Caabudo'Jidka uu farayna lagu socdaa.
Rasuulkuna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebe wuxuu ku dulleeyey Banii aadamka Geeri, wuxuuna ka yeelay adduunka Guri nolol iyo Geeri, kana yeelay Aakhirana Guri abaalmarin iyo Waarid. Waxaa wariyey Ibnu Abii Xaatim. Al-Mulk (1-5).

---

6. Kuwa ka gaaloobay Eebahood waxaa u sugnaaday Caddibaadda Jahannamo,meel loo ahaadana iyadaa u xun.

وَلِلَّذِينَ كَفَرُوا۟ بِرَبِّهِمْ عَذَابُ جَهَنَّمَ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ٦

7. Marka Gaalada lagu tuuro Naarta waxay ka maqli Cod xun oo daran iyadoo karaysa.

إِذَآ أُلۡقُواْ فِيهَا سَمِعُواْ لَهَا شَهِيقٗا وَهِيَ تَفُورُ ٧

8. waxay u dhawdahay inay Cadha daraadeed la kala dillaacdo,marka Koox (Gaala ah) lagu ridaba waxaa warsada Malaa‘igta Naarta ka shaqeysa iyagoo ku dhihi miyuusan idiin imaanin wax idiin diga.

تَكَادُ تَمَيَّزُ مِنَ ٱلۡغَيۡظِۖ كُلَّمَآ أُلۡقِيَ فِيهَا فَوۡجٞ سَأَلَهُمۡ خَزَنَتُهَآ أَلَمۡ يَأۡتِكُمۡ نَذِيرٞ ٨

9. Waxayna ugu jawaabi waa noo yimid wax noo diga waanse beeninay, annagoo leh ma soo dejinin Eebe waxba, idinkuna waxaad ku sugan tihiin baadi weyn.

قَالُواْ بَلَىٰ قَدۡ جَآءَنَا نَذِيرٞ فَكَذَّبۡنَا وَقُلۡنَا مَا نَزَّلَ ٱللَّهُ مِن شَيۡءٍ إِنۡ أَنتُمۡ إِلَّا فِي ضَلَٰلٖ كَبِيرٖ ٩

10. Gaaladii waxay dhaheen haddaan wax maqlaynno ama aan wax kasayno Naarta Saciiro ehelkeeda ma aanaan noqoneen.

وَقَالُواْ لَوۡ كُنَّا نَسۡمَعُ أَوۡ نَعۡقِلُ مَا كُنَّا فِيٓ أَصۡحَٰبِ ٱلسَّعِيرِ ١٠

11. Waxay qirteen (Gaaladu) dambigoodii waxaana u sugnaatay fogaansho Naarta Saciiro ehelkeeda.

فَٱعۡتَرَفُواْ بِذَنۢبِهِمۡ فَسُحۡقٗا لِّأَصۡحَٰبِ ٱلسَّعِيرِ ١١

Xaq diidayaashu waxay geli Naar daran oo karaysay qaylana leh, Malaa’igtuna si canaan iyo guulguul ah yey u warsataa in Rasuul u diga loo soo diray iyo in kale, iyaguna way qirtaan in Rasuul loo soo diray ayse beeniyeen xaqiina diideen, wayna calaacaleen iyagoo leh haddaan wax kasayno Naar ma aanan galleen, saas daraadeed waa in Eebe laga yaabo laguna waano qaato Arrintaas.
Waxaa sugnaaday: Dadka lama halaago intay Naftoodu ka garaabaan. Al-Mulk (6-11).

---

12. Kuwa Eebe ka yaaba iyagoon la arkaynin (Eebe mooyee) waxaa u sugnaaday dambi dhaaf iyo ajri weyn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ يَخۡشَوۡنَ رَبَّهُم بِٱلۡغَيۡبِ لَهُم مَّغۡفِرَةٞ وَأَجۡرٞ كَبِيرٞ ١٢

13. Ama hadalka hoos u dhiga dadow ama kor u qaada Eebe waa ogyahay waxa laabta ku jira.

وَأَسِرُّواْ قَوۡلَكُمۡ أَوِ ٱجۡهَرُواْ بِهِۦٓۖ إِنَّهُۥ عَلِيمُۢ بِذَاتِ ٱلصُّدُورِ ١٣

14. Ma waxaan wax ogeyn Eebaha wax walba abuuray ee wax walba daalacan.

أَلَا يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ١٤

15. Eebe waa kan Dhulka ka dhigay mid laylyan ee ku socda Waddooyinkiisa kana Cuna Quudkiisa Eebaana Dadka loo soo kulmin (Qiyaamada).

هُوَ ٱلَّذِي جَعَلَ لَكُمُ ٱلۡأَرۡضَ ذَلُولٗا فَٱمۡشُواْ فِي مَنَاكِبِهَا وَكُلُواْ مِن رِّزۡقِهِۦۖ وَإِلَيۡهِ ٱلنُّشُورُ ١٥

16. Miyaad ka aamin noqoteen Eebaha Sare inuu Dhulka idin la gooyo, ayna idinla dhaqdhaqaaqdo.

ءَأَمِنتُم مَّن فِي ٱلسَّمَآءِ أَن يَخۡسِفَ بِكُمُ ٱلۡأَرۡضَ
فَإِذَا هِيَ تَمُورُ ١٦

17. Miyaadse ka aamin noqoteen Eebaha Sare inuu Dhagaxyo Naar ah idinku soo daadiyo, waad ogaan doontaan digniinta Eebe Cidhibteeda.

أَمۡ أَمِنتُم مَّن فِي ٱلسَّمَآءِ أَن يُرۡسِلَ عَلَيۡكُمۡ حَاصِبٗاۖ
فَسَتَعۡلَمُونَ كَيۡفَ نَذِيرِ ١٧

18. Waxaa Eebe beeniyey Gaaladii (reer Makaad) ka horreeyey, sidayse ahayd Ciqaabti Eebe.

وَلَقَدۡ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبۡلِهِمۡ فَكَيۡفَ كَانَ نَكِيرِ ١٨

Dadka Eebe Dhabnima u rumeeyey way Caabudi kana dhoowrsan xumaanta iyagoon arkaynin ama dad ha la joogeen ama keli ha ahaadeene.
Eebana wuxuu ku abaal marin dambi dhaafkiisa, Eebaha wax walba og ee Dhulka laylyey ee Qiyaamada loo soo kulmi miyaa Ciqaabtiisa Cidna ka aamin noqon kartaa, dadka xun iyo Gaaladaba waxa u caada ah inay Eebe beeniyaan, waxaase ku dhici Ciqaabta Eebe, waxaana ka nabad geli ruuxii Waddada Eebe qaada.
Toddobada Eebe hadheeyo Maalinta Qiyaame waxaa ka mid ah kuwa Eebe kayaaba iyo kuwa Xusuusta iyagoo kali ah Indhahooduna Ilmeeyaan. (Waa Saxiix). Al-Mulk (12-18).

---

19. Miyeyna dadku arkaynin Shimbirka korkooda ah marna baalka fidin marna laabi wax haya oon Eebaha Raxmaan ahayna uusan jirin, Eebana wax walba wuu arkaa.

أَوَلَمۡ يَرَوۡاْ إِلَى ٱلطَّيۡرِ فَوۡقَهُمۡ صَٰٓفَّٰتٖ وَيَقۡبِضۡنَۚ
مَا يُمۡسِكُهُنَّ إِلَّا ٱلرَّحۡمَٰنُۚ إِنَّهُۥ بِكُلِّ شَيۡءِۭ بَصِيرٌ ١٩

20. Waa kuma Gargaaraha Eebaha Raxmaan ah ka soo hadhay ee u gaargaari Gaalada, Gaaladu waxay ku sugan yihiin kadsoomid.

أَمَّنۡ هَٰذَا ٱلَّذِي هُوَ جُندٞ لَّكُمۡ يَنصُرُكُم مِّن دُونِ ٱلرَّحۡمَٰنِۚ
إِنِ ٱلۡكَٰفِرُونَ إِلَّا فِي غُرُورٍ ٢٠

21. Waa kuma kan wax quudiya haddii Eebe haysto Risqigiisa, Gaaladu waxay ku Madax adaygeen isla weyni iyo Xaq diidnimo.

أَمَّنۡ هَٰذَا ٱلَّذِي يَرۡزُقُكُمۡ إِنۡ أَمۡسَكَ رِزۡقَهُۥۚ بَل لَّجُّواْ
فِي عُتُوّٖ وَنُفُورٍ ٢١

22. Midkee wanaagsan Ruux Wajiga ku socda iyo mid si toosan oo siman Wadda Toosan ugu socda.

أَفَمَن يَمۡشِي مُكِبًّا عَلَىٰ وَجۡهِهِۦٓ أَهۡدَىٰٓ أَمَّن يَمۡشِي سَوِيًّا
عَلَىٰ صِرَٰطٖ مُّسۡتَقِيمٖ ٢٢

23. Dheh Nabiyow Eebe waa midka Dadkow idin ahaysiiyey, Maqal iyo Arag iyo Caqlina idiin yeelay, wax yar baadse Eebe ku shukridaan.

قُلۡ هُوَ ٱلَّذِيٓ أَنشَأَكُمۡ وَجَعَلَ لَكُمُ ٱلسَّمۡعَ
وَٱلۡأَبۡصَٰرَ وَٱلۡأَفۡـِٔدَةَۚ قَلِيلٗا مَّا تَشۡكُرُونَ ٢٣

24. Dheh Eebe waa midka dadkow Dhulka idinku beeray isagaana (Qiyaamada) loo soo kulmin doonaa Dadka.

قُلْ هُوَ ٱلَّذِى ذَرَأَكُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَإِلَيْهِ تُحْشَرُونَ ﴿٢٤﴾

**Eebe awooddisa yaa wax walba ka sarreysa, Gargaare, Quudiye, Abuure iyo wax walba ogaadana waa isaga, maalinta Qiyaamana waa la hor imaan, Ruux walbana wuxuu ku Abaal Marin Camalkiisa. Nabiguna wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiis ha yeelee) markii la warsaday sidee Dadka loogu soo kulmin Wajigooda:**
**Eebaha ku socodsiiyey Lugahooda wuxuu karaa inuu kusocodsiiyo Wajigooda. Al-Mulk (19-24).**

---

25. Waxay dhihi Gaaladu waa goorma Waqtiguu dhici waxa naloogu gooddin haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَٰذَا ٱلْوَعْدُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٢٥﴾

26. Dheh Eebaa og goortaas, waxaanse ahay Anigu u dige Cad (muuqda).

قُلْ إِنَّمَا ٱلْعِلْمُ عِندَ ٱللَّهِ وَإِنَّمَآ أَنَا۠ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٢٦﴾

27. Markaysa Gaaladu Naarta oo u dhow arkaan waxaa xumaan oo doorsoomi Wajiga Gaalada, waxaana lagu dhihi waaka Cadibaaddii aad doonayseen (dedejisanayseen).

فَلَمَّا رَأَوْهُ زُلْفَةً سِيٓـَٔتْ وُجُوهُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟
وَقِيلَ هَٰذَا ٱلَّذِى كُنتُم بِهِۦ تَدَّعُونَ ﴿٢٧﴾

28. Dheh balse ka warrama haddii Eebe aniga (Nabiga) iyo inta ila jirta uu halligo ama u naxariisto yaa Gaalo ka korin Caddibaad daran.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَهْلَكَنِىَ ٱللَّهُ وَمَن مَّعِىَ أَوْ رَحِمَنَا
فَمَن يُجِيرُ ٱلْكَٰفِرِينَ مِنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ ﴿٢٨﴾

29. Dheh Eebe waa Raxmaan waana rumaynay, waana Tala saaranay, waadse ogaan doontaan (Gaalooy) Cidda Baadi Cad ku sugan.

قُلْ هُوَ ٱلرَّحْمَٰنُ ءَامَنَّا بِهِۦ وَعَلَيْهِ تَوَكَّلْنَا فَسَتَعْلَمُونَ
مَنْ هُوَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٢٩﴾

30. Dheh balse Warrama hadday Biyuhu Dhulka ku gudhaan yaa idin siin Biya durduri (ma jiro Eebe waxaan ahayn).

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَصْبَحَ مَآؤُكُمْ غَوْرًا فَمَن يَأْتِيكُم
بِمَآءٍ مَّعِينٍ ﴿٣٠﴾

**Dadka xun had iyo jeer aad uma fikiraan saas daraadeed waxay ku hadlaan gafaf iyo Xujooyin Qiimo daran, Nabiguna(Naxariis iyo Nabad gelyo Eebe korkiisa ha yeelee) Shaqadiisu waa inuu dadka wanaag ugu yeedho, xumaantana uga digo, wax walbase Eebaa kara oo og, markase uu Gaalada haleelo Caddibaad daran yey ogaan doonaan dhabta iyo xaqiiqada'gargaarka kuwa xaqa rumeeyey iyo Imtixaankoodaba Eebaa leh, Gaalana Caddibaad kama baajinayso'ee waa in Eebaha Raxmaan ee awoodda leh ee dadka quudiya isaga uun la Caabudaa lagana yaabaa. Al-Mulk (25-30).**